



## Shuruudaha Talaalka

Sharciga dawlad-goboleedku wuxuu shardi ka dhigeyaa in carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 sanno laga talaalo cuduro gaar ah, haddii talaalkaas aan looga dhaafin arrin caafimaad ama waxyaabo uu aaminsan yahay darteed. Marka ilmaha dugsiga laga diiwaangelineyo, waxaa loo baahan yahay in la keeno caddeyn ku saabsan dhammaan talaaladii ugu dambeeyey ee uu qaatey.

Si ilmaha dugsiga loogu qoro wuxuu u baahan yahay talaaladan soo socda:

- **Dabeysa ( Polio)**- qiyaasta dawo afar jeer la siiyo (isku jirka mid kasta ee IPV ama OPV); qiyaasta dawo saddex jeer la siiyo waa la oggol yahay, haddii hal (1) markuu afar jirsadey kedib la siiyey ee carruurta da'doodu u dhexeyso 4-6 jir. Qiyaasta dawo 3 jeer la siiyo waxay buuxineysaa shuruudaha looga baahan yahay ilmaha da'doodu u dhexeyso 7-17 haddii markii uu 2 jirsaday ama kedib hal la siiyey.
- **DTP/DaP** – (diphtheria, teetano, iyo xiiqdheer 7 jir ka hor); qiyaasta dawo shan jeer la siiyo; qiyaasta dawo afar jeer la siiyo shuruudaha looga baahan yahay wey buuxin karaan, haddii dawadii ugu dambeeysey la siiyey 4 jir markuu noqdey kedib.
- **Hib** – (haemophilus hargabka xun ee nooca b loo yeqaano) waxaa looga baahan yahay carruurta ka yar afar sanno iyo lix bilood.
- **TD** – (teetano, diphtheria toddoba sanno iyo wixii ka weyn) –qiyaasta dawo afar jeer la siiyo ayaa looga baahan yahay, laakiin saddex dawo wey buuxineysaa shuruudaha carruurta looga baahan yahay ee ay da'doodu u dhexeyso 7 ilaa iyo 17, haddii ugu yaraan uu hal dawo qaato markuu laba jirsado kedib.
- **MMR** – (jadeeco, qoomoqaanshiir, nooc jadeecada ka mid ah (measles, mumps, rubella) qiyaasta dawo hal mar la siiyo marka ay carruurta hal sanno jiraan kedib, waana carruurta soo galeysa xanaanada bisha Agoosto 1 deeda, 1997 ka hor. Qiyaasta dawo laba jeer la siiyo ayaa carruurta xanaanada soo galeysa iyo kuwa fasalka koowaad soo galeyaa ee aan dugsiga xanaanada ku soo qaadan California ee aan la siin talaalka MMR ee labaad. Carruurta soo galeysa fasalka 7aad waxaa looga baahan yahay inay qaataan talaalka MMR ee labaad. Akademiyada Cuduradda Carruurta ee Maraykanku waxay ku talineysaa in dhammaan carruurta la siiyo talaalka labaad ee MMR.
- **Cagaarshow (Hepatitis B)** – qiyaasta dawo saddex jeer ayaa la siineyaa carruurta xanaanada iyo kuwa fasalka koowaad soo galeysa ee aan dugsiga xanaanada ku soo qaadan California ee Cagaarshowga si isdabajoog ah looga talaaley. Ardeyda soo galeysa fasalka 7aad waxaa looga baahan yahay inay talaalka Cagaarshowga soo qaataan.
- **Bus-bus (Chicken pox)** – Ilmaha xanaanada ah waxaa looga baahan yahay qiyaasta dawoi hal (1) mar la siiyo ama caddeyn ah inuu fayow yahay. Ardeyda dawlad-goboleedyada kale ka timaada ee Fasalada 1-12 waa inay keenaan caddeyn ku saabsan talaalka bus-buska ama qoraalo muujineya inaysan cudur qabin. Ilmaha 13 jirsadey waxaa looga baahan yahay
- Fadlan si aad u habsatid in ilmahaaga uu qaatey talaaladii uu u baahnaa iyo in kale waxaad ka habsataa dhakhtarka carruurta, dhakhtarka qoyska, ama sheybaadhka caafimaadka. Haddii shuruudahaas la soo kaamili waayo, ilmahaaga dugsiga waa laga joojineyaa. Waxaad kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga aad ka heli kartaa warbixinada ku saabsan waxyaabaha caafimaad darteed si joogto ah ilmahaaga looga dhaafi karo iyo weliba waxyaabaha aad aaminaada shakhsiyeed u diidan tahay ee caafimaadka la xidhiidha. Marka uu waalidku oggolaansho bixiyo kedib ayuu kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga ilmaha talaali karaa.

*Somali Version; Immunization Requirements05-06*

*Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation*

Warbixinta kala xidhiidh: Barnaamijka Caafimaadka Wacan (858) 627-7580

Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578

[www.sandi.net](http://www.sandi.net)

Waxaa la naqtiimay 10/03/05

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 136,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 202 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

**“Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah.”**